
# ADDUUNKAYGA




REGION SKÅNE

**Magaca:** ______________________________

**Qofkaani waa aniga…**


(Halkaan ku masawir ama qor)

# Gramse, Mallo iyo hooyo



Gramse wuu yar yahay wuxuuna leeyahay dhego dhaadheer, wuxuuna ku nool yahay kaynta dalka ”Hittapou”. Midabka Gramse caadi ahaan waa guduud-buluug isku qasan, laakinse wuxuu mararka qaarkood iska beddela midabkiisa, iyada/isaga ma garanaayo sababta. Markii iyada/isaga ay/u dibada ku sugan tahay/yahay ee ay/u daawanayso/daawanaayo shimbiraha, waxay/wuxuu caadi ahaan la joogta/jooga hooyadeeda/hooyadiisa Gramsa.

Hooyada Gramse oo magacayda la yiraahdo Gramsa ma caafimaad qabto, way **jirran tahay**. Hooyada Gramse waxaa badi ahaan lagu daryeelaa **isbitaalka** mararka qaarkood waxay wadahadal la yeelataa qof **maamulka adeegga bulshada** ka hawlgala.



Gramse wuxuu badi ahaan is-waydiiyaa sababta hooyadiisa ay u xannuunsan tahay, ama sababta ay xaaladeeda sidaas u noqotay.

Markii hooyada Gramse ay tahay qof hab dheeraad ”loola yaabo”, cod sare u kacsan ayay ku hadashaa, saacado yar ayay huruda waxaana soo booqda saaxiibo badan.

Aabeha Gramse berri hore ayuu **geeriyooday**. Hab dhaqsi badan ayuu u dhintay, waxa keliya u Gramse xasuusto waa gaadiidka gargaarka degdegga oo nalkiisa buluug ka walalac siinaayo.

Gramse wuxuu la sheekaystaa saxiibkiisa Mallo, iyada/isaga wuxuu had iyo jeer u dhaqmaa hab wanaagsan, wuxuuna yiraahda ereyo fiican. Gramse iyo Mallo waxay wada ciyaaraan dhuudhuumasho waxayna gacanta ku wada masawiran waxyaallo.

Gramse wuxuu mararka qaarkood la kulma carruur kale iyo dad waawayn, kuwaasoo iyagana su’aallo badan waydiiyaan sida oo kale oo ku saabsan xaalada hooyada Gramse.

Maanta waa maalintaaso kale, Gramse wuxuu la kulmi doonaa Mallo kaddib waxay wada qaban doonaa koox oo ay ka wada hadli doonaan iyo laga yaaba in xoogaa ay wax gacanta ku masawiraan.



**Jerran** – Qofku siyaabo kala duwan ayuu u xannunsan karaa, qofku wuxuu dareemi karaa qandho iyo kuleel, qof kalena wuu qufaca ama u xannuun dhuunta ka dareemaa. Jirrada waxay kaloo noqon kartaa in qofku u gudaha ka caafimaad qabin, ama uu ka fekeraayo hab la yaab leh ama u mararka qaarkood samaynaayo waxyaalo yaab leh. Jirrada waxay kaloo noqon kartaa in qofku u cunno ama cabbo waxyaale la yaab leh, kuwaasoo caafimaadkiisa u wanaagsanayn. Jirrada waxay noqon kartaa mid halis ah oo muqaal gaar leh. Waxaa laga yaaba in bukaanka usan hab caadi ah u socon karin ama hadli karin. Qofku wuxuu jirran karaa muddo dheer ama gaaban. Mararka qaarkood wuxuu bukaanka u baahan yahay in caafimaad-wanaagga dartiisa dadka kale oo waawayn caawiyaan.

**Bukaanka hab sahlan uma tilmaami karo xaaladiisa, ee maxay kula/idin tahay?**
Halkaan gacanta ku masawir, ku dheji kuna qor.

**Isbitaalka** – Isbitaalka waxaa ka hawlgala dad waawayn oo badan oo tixgeliya xaaladda carruurta, iyo xitaa carruur hooyadooda, aabehooda ama dadyoow kale oo xannuunsan. Dadka waawayn ee isbitaalka jooga waxay mararka qaarkood sitaan funaanado waawayn, kuwaaso midabyada cad iyo buluug lahaan karo, cagaar laakin muqaal gaar ah lahaan karo. Carruurta waxay isbitaalada badidooda ku booqan karaan hooyadooda ama aabehooda jirran. Qolka wuxuu lahaan karaa goob carruurta ay ku ciyaaran, sariir iyo telefishan. Waa sida guri yar oo kale. Isbitaallada badidooda way waawayn yihiin. Sidaas awgeed, waxaa mar kasta fiican in la waydiiyo haddii la heli karo iyo la fahmi karo. Dadka waawayn ee isbitaalka jooga waxay wax badan ka garanayaan xaaladda qofka jirran, waxayna ka jawaabi karaan su'aallo badan.

**Hab fudud laguma tilmaami karo waxaa isbitaal loola jeedo iyo shaqooyinka shaqaalaha ay qabtaan. Maxay kula/idin tahay?**
Halkaan gacanta ku masawir, ku dheji kuna qor. Waxaa laga yaaba inaad qof isbitaalka ku soo booqatay ama ku booqan doonto?

**Maamulka adeegga bulshada (socialtjänsten)** – Maamulka adeegga bulshada waxaa ka hawlgala dad badan oo tixgeliyaa xaaladda carruurta, iyo carruurta hooyooyinkooda, aabeyaashooda iyo dadyoowga kale ay xannuunsan yihiin. Sida isbitaallada oo kale ayuu xubnaha qoyska ama cunugga u booqan karaa Maamulka adeegga bulshada oona wada-hadallo la yeelan karaan. Hawlwadeneyada Maamulka adeegga bulshada waxay mararka qaarkood booqan karaan dugsiyada ama cunugga xannuunsan ku booqan karaan gurigiisa. Hawlwadeneyada Maamulka adeegga bulshada iyo Isbitaalka, cunugga, hooyada, aabeha iyo xitaa dad kale way wada kulmi karaan. Waxaa taasi u sabab ah in qof kasta wax buu ku fiican yahay mararka qaarkood waa in la caawiyaa cunugga, qoyska iyo is caawiyaan.

**Waxaa dhici karto in hab fudud lagu qeexi karin waxa Maamulka adeegga bulshada u yahay iyo dadyoowga halkaas ka shaqeeya. Maxay kula/idin tahay?**
Halkaan gacanta ku masawir, ku dheji kuna qor. Waxaa dhici karto in aad la kulantay ama aad la kulmi doonto qof Maamulka adeegga bulshada ka shaqeeyaa?

**Dhimashada** – Dhimashada hab fudud laguma macnayn karo. Qaar waxay aaminsan yihiin in sammadda ay u duuli doonaan, qaar kalena in hurdada aysan marna ka toosi doonin. Qaar waxay amminsan yihiin in jannada ay geli doonaan, qaar kalena in xayawaan ama qof kale isku rogi doonaan.

**Maxay kula/idin tahay?**
Halkaan gacanta ku masawir, ku dheji kuna qor.


**Halkaan gacanta ku masawir, ku dheji kuna qor.**

**Halkaan gacanta ku masawir, ku dheji kuna qor.**


# Waddadayda

Mararka qaarkood dhacdoonada isla mar ayay dhacaan ama way isku wada xigaan. Xaaladaas waxaa fiican in laga wada hadlo waxa imminka dhacaayo iyo waxa goor dambe dhici doono.

**Ku isticmaal masawirrada ama kuwa adiga aad gacanta ku masawirtay, kaddib ku dheji halka adiga kula habboon.**
Halkaan ayaa adiga/idinka ka hadli kartaa/kartiin dhacdoonada kala duwan.








# Keydka masawirrada

– Masawirro laga soo fuqsan karo




Masawirrada Adiga ku gaar ah